



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI LR. 20

Taariikh: 05/02/2020

ANSIXINTA WAX KA BEDELKA SHARCIGA IIBKA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurks KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Lr.GSH253/12/01/B-10/20 taariikh 16/01/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Wax ka bedelka iibka Qaranka

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Wax ka bedelka Sharciga Iibka Qaranka.


Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 05/02/2020



Madaxweynaha J. F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"



Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: GSH/253 /12/01/B-10/20 الرقم:

Mogadishu- Jan 16, 2020: التاريخ

- Ku: Madaxweyanaha Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya
Muqdishu
- Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare
Muqdishu
- Og: Ra'iisul wasaaraha Xukuumadda Federaalka
Muqdishu
- Og: Guddiga Miisaaniyadda iyo L/X Hay'adaha Dawladda ee Golaha Shacabka
Muqdishu
- Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda
Muqdishu
- Og: Hantidhawrka Qaranka
Muqdishu
- Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
Muqdishu
- ✓ Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka
Muqdishu

Ujeedo: Wax ka Bedelka Sharciga iibka ee Qaranka

Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, Wax ka Bedelka Sharciga iibka ee Qaranka ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbiyey Xafiiska R/Wasaaraha XFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talagaly Guddiga Miisaaniyadda iyo L/X Hay'adaha Dawladda ee Golaha Shacabka; iyadoo xildhibaanada Golaha Shacabka ay ka doodeen. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku aqbalay wax ka bedelkii Aqalka Sare ku

soo sameeyey Sharcigan Kalfadhiga 6-aad Kulankiisii 31-aad taariikhdu markay ahayd 15/01/2020 iyadoo 142 Xildhibaan xaadir yihiin, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

Oggol: 141;


Diiday: 0;

Ka aamustay: 1;

Aqalka Sare ee Baarlamaanka Fadaraalka Soomaaliya, waxuu Golaha Shacabka u soo gudbiyey Sharcigan oo Ansax ah, oo wax ka badel lagu sameeyey nuqulkii Golaha Shacabku horey ugu direy Aqalka sare. Waxuu Aqalka Sare ugu soo gudbiyey Golaha Shacabka warqadda tirsigeedu yahay Ref/53 kuna taariikhaysan 12/12/2019.

Hadaba M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (f) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka, kaaga codsanayaa inaad go'aanka Golaha ku ogolaato Xeer Madaxweyne, si loogu soo saarto Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Naga Guddooma Salaan Qiimo iyo Qadarin Xanbaarsan


M.ne Maxmaed Mursal Sheikh Abdirahmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS



Tell: +252 6 1 2224442 / +252-615577472

E-mail. speaker@parliament.gov.so mmursal44@hotmail.com

WAX KA BADELKA SHARCIGA IIBKA QARANKA
EE SOOMAALIYA

Guddoomiyaha Golaha Shacabka- Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 142 : Oggol: 141; Diiday: 0; Ka aamustay: 1;

Saxiix: M.ne Maxamed Mursal Sheikh Cabdirahman

Taariikh: Jan 16, 2020



Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Golaha Shacabka
Baarlamaanka JFS

Saxiix: M.ne Abdiweli Sh. Ibrahim Muudey

Taariikh: Jan 16, 2020



Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS

Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux

Taariikh: Jan 16, 2020





Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: 438/B-10/19: الرقم

Mogadishu, Date: November 4, 2019: التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare

Og: Madaxweyanaha JFS

Og: Ra'iisul Wasaaraha XFS

Og: Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta iyo La-Xisaabtanka Hay'adaha Dowladda

Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda

Og: Hantidhawrka Qaranka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka

UJEEEDO: Soo Gudbin Dib-U-Eegista Sharciga Iibka Qaranka

Mudane Guddoomiye, Mudanayaal,

Sida aad la socotaan, **Dib-u-eegista Sharciga Iibka Qaranka** ee halkaan ku lifaaqan waxaa soo gudbisay Wasaaradda Maaliyadda ee XFS, Kadib waxaa ka baaraandagay oo habraacii loogu talagalay marsiiyay Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta iyo La-xisaabtanka Hay'adaha Dowladda ee Golaha Shacabka ayadoo xildhibaanada ay kaga doodeen akhrinta 2aad. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay wax ka badalka Sharciga Kalfadhiga 6-aad fadhigiisa 6aad taariikhdu markay ahayd 30/10/2019, codayntuna sidaan ayay u dhacday:

Kooramka: 141

Oggol: 133

Diiday: 2

Ka aamustay: 6

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye waxaa halkaan ku lifaaqan Wax ka badalka Sharciga uu Golaha Shacabku ansixiyay, si aad oga gudataan wax ka badalka Sharciga uu

M.ne Maxamed Mursal Shiekh Cabdiraxmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS



Ansixinta Wax ka badalka Sharciga Iibka Qaranka

Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka JFS


Koramka:141

Oggol: 133

Diiday: 2

Ka aamustay: 6

Saxiix: M.ne Maxamed Mursal Sh. Cabdiraxmaan



Tr: November 4, 2019

Guddoomiye ku-xigeenka 1-aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS



Saxiix: M.ne Cabdiweli Ibraahim Sh. Muudey

Tr: November 4, 2019


Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka ee BJFS



Saxiixa: M.ne Cabdikariim Xaaji Cabdi Buux

Tr: November 4, 2019

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiye KX 1aad



جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب النائب الأول

Ref: 53 / _____ : الرَّ

Federal Republic Of Somalia
The Upper House
Office Of The 1st Deputy Speaker

Taariikh-Date: 12/12/2019 : التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda
Og:- Guddiga Maaliyadda ee Aqalka Sare
Og:- Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=

Ujeeddo:

Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Wax-Ka-Beddelka Sharciga Iibka & Qandaraasyada Qaranka)


Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay Tix: GAS/B-10/KF6/07/2019 kuna taariikheysan 03 Dec. 2019 kuna ansixiyay Goluhu Sharciga Wax-Ka-Beddelka Sharciga Iibka & Qandaraasyada Qaranka:

- Waxaa codeeyay: 30 Senatar.
- Waxaa oggolaaday: 30 Senatar.
- Waxaa diiday: 0 Senatar.
- Waxaa ka aamusay: 0 Senatar.

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad u gudataan waajibka dastuuriga ee la idin igmaday.

Iga guddoon qadarin.


Sen. Abshir Maxamed Axmed
Ku-Xigeenka 1aad Ahna Ku-Simaha Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya





ANSIXINTA SHARCIGA WAX-KA-BEDDELKA SHARCIGA IIBKA & QANDARAASYADA QARANKA

Senatarrada Codeevay	Oggolaaday	Duday	Ka Aamusay
30	30	0	0

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya



Taariikh: 03^{da} Disembar 2019

Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi

Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya



Taariikh: 03^{da} Disembar 2019


Sen. Abshir Maxamed Axmed

Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya



Taariikh: 03^{da} Disembar 2019

Sen. Mowliid Xuseen Guddoo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**SHARCIGA WAX-KA-BEDDELKA
SHARCIGA IIBKA & QANDARAASYADA QARANKA**

QOD.1^{AAD}
Magaca Sharciga

1. Magaca Sharciga Iibka & Qandaraasyada Qaranka ee 2016 waxaa loo beddelay “Sharciga Iibka ee Qaranka”

QOD.2^{AAD}
Qeexitaannada

2. Qod.3^{aad} ee ku saabsan Qeexid, Faqradda 1^{aad} waxay u qormaysaa sidan:
(Sarkaalka Idman: waxaa loola jeedaa qofka loo magacaabo Sarkaalka Madaxa Hay’adda Dowladeed ee fulineysa iibka iyo qandaraasyada.)

QOD 3^{AAD}
Kordhin Qodob Cusub

1. Sharciga Iibka & Qandaraasyada Iibka ee 2016 waxaa lagu kordhiyay qodob cusub oo u qoran sidan:

Qod.3^{aad} Bis
Sarkaalka Idman ee Ururada Dowliga & Shirkadaha ay Dowladdu Leedahay

1. Hay’ad kasta iyo mashruuc ama wakaalad kasta oo dowladeed waxaa loo magacaabayaa Sarkaal Idman kaas oo caadiyan ah sarkaalka mas’uulka ka ah hay’adda ama mashruuca. Sarkaal Idman waxaa ka mid ah;
 - b)** Agaasimaha Guud ee Xafiiska Madaxwaynaha Dawladda Federaalka ee Soomaaliya;
 - t)** Agaasimaha guud ee Xafiiska Raysulwasaaraha Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya;
 - j)** Labada Xoghaye Guud ee Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka;
 - x)** Agaasimaha Guud ee Maxkamadda Sare;
 - kh)** Hanti-dhowraha Guud ee Xafiiska Federaalka Hanti-dhowraha Guud ee madaxa-bannaan;
 - d)** Agaasimaha Maamulka iibka Dawladda Federaalka;
 - r)** Agaasimaha Guud ee masuulka ka ah Maaliyadda ee Wasaaradda Federaalka;
 - s)** Agaasimaha Guud ee masuulka ka ah Maaliyadda Komishinka Qaranka;
 - sh)** Agaasimaha Guud ee masuulka ka ah Maaliyadda hay’ad dawli ah ama shirkad dowladdu leedahay ee uu ansixiyay wasiirka ay qusayso.

2. Sarkaalka idman ee Wasaaradda Federaalka ah wuxuu gudanayaa waajibaadkiisa asagoo raacaya jiheynta guud ee Wasiirka Federaalka ah ee Wasaaradda Federaalka ah, laakiin Wasiirka Federaalka lama wareegi karo awoodda Sarkaalka idman. Haddii Sarkaalka idman iyo Wasiirka Federaalka isku waafaqi waayaan fasiraadda sharicigan, Sarkaalka idmani wuxuu jiheyn weydiisanayaa Wasaaradda.

QOD 4^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.27 Faqradda 3^{aad}

1. Qod.27^{aad} Faqradda 3^{aad} kuna saabsan Qorshaha Qandaraaska Iibka waxaa loo beddelay sidan: (Guddiga Qandaraaska Iibka wuxuu ogolaanaya qorshaha qandaraaska iibka wuxuuna si joogta ah dusha kala soconayaa hawsha fulinteeda.
 - (i) Marka iibka gaarka ah ee ku xusan qorshaha iibka uu dhaafo qiimihii la jaangooyay ee ku xusnaa Xeer nidaamiyaha, qorshaha iibka waa inuu ansixinayo Guddiga Iibka Hay'adda.
 - (ii) Marka xaaladdan oo kale ay jirto, Wasiirku wuxuu xeer-nidaamiye ku caddayn karaa shuruudaha korjoogteynta dheeraadka ee ku habboon hababka iibka gaarka ah ee ka saramara qiimiha la jaangooyay.
 - (iii) Shuruudaha caynkaasi ah waxaa ku jira indho-indhayn, ama dib u eegidda qoraallada iyo hababka tartanka ee Guddiga Qandaraasyada.)

QOD 5^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.29^{aad} Faqradda 4^{aad}

1. Qod 29^{aad} Faqradda 4^{aad} ku saabsan Sixitaanka Qiimaha waxaa loo qoray sidan: (Kala duwanaansha kasta oo qiima ee ka badan boqolkiiba inta lagu xusay xeernidaamiyayaasha ee qiimaha heshiiska asalka waxey hoos imanaysaa si loo ansixiyo Guddiga Qandaraaska Iibka ay khuseyso.)

QOD 6^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.30^{aad}

1. Qod 30^{aad} ee ku saabsan Ansixinta iyo Wax ka bedelka Heshiisyada waxaa loo qoray sidan:

Qod 30^{aad}

Ansixinta iyo Wax ka bedelka Heshiisyada

1. Ansixinta abaalmarinta heshiis la soo-jeediyay waxay noqon doonaan si waafaqsan Xeernidaamiyaha.
 - (i) Xeer Nidaamiyayaashu waxa ay u jaangoyn karaan qaddar ama xaddi lacageed marka Madaxa Waaxda iibka, Guddiga iibka, ama cid kale oo uu wasiirku u xilsaaray ay ansixinasyo qandaraasyada lagu guulaystay.

- (ii) Si loo gaaro ujeedkaas, Wasiirku wuxuu kaloo hir galin karaa guddi qandaraas, waxaana lagu qeexi doonaa Xeer nidaamiye.
2. Wax ka baddalka qandaraaska sare u qaadaya qiimihii hore, waa in ay ogolaato Hay'adda Iibka ay ogolaadaan (approved) ka hor intaan la saxiixin, markay jiraan xaaladahan:
 - (a) Marka hay'adda looga baahanyahay ansixnta qiimaha qandaraaska la beddelay, iyadoo la eegayo xaddiga qiimaha la jaangooyey ee qodobka 30aad faqradiisa 1aad ay ka duwanaato hay'addii ansixisay qandaraasyadii horey loogu soo guulaystay; ama
 - (b) Marka kororka qiimaha qandaraasku uu ka badanyahay midkii xaddiga boqollayda ee lagu caddeeyay xeer nidaamiyaha.
 3. Wasaaraddu waxay xeer nidaamiye ku caddayn kartaa duruufaha keenaya in wax ka baddal lagu sameeyo qandaraaska oo kordhin kara qiimiha, in ka badan boqoleeyda lagu caddeeyay xeer nidaamiyaha oo keeni karto ogolaansho.

QOD 7^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.31^{aad}

1. Qod.31^{aad} Faqradda 9^{aad} ee ku saabsan Kaydka iyo Warbixinnada ee Qandaraaska Iibka: (Warbixinnada iyo dokumintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaalanka Musuqmaasuqa, iyo Hanti Dhowraha Guud, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah iyo xafiis dowladeed kasta ee lagu aaminay mas'uulidaas marka la codsado si ay u baadhaan, kaas oo xaqiijin doona caddaaladnimada, dhex dhexaadnimada tartan la mariyay isla markaana lahaanshaha qiimo macquul ah.)

QOD 8^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.38^{aad}

1. Qodobka 38^{aad} Faqradda 1^{aad} ee ku saabsan Xubinnimada iyo Magacaabista Guddiga waxaa loo qoray sidan: (Guddiga wuxuu ka kooban yahay sagaal **(9)** qof ee u magacaabayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, ka dib markey u soo Jeediyaan Golaha Wasiirada, Wasiirka Maaliyaddana waa in uu kala tashadaa soo jeedinta Guddiga Iibka ee Qaranka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, isla markaasna xaqiijiyaa qoondada haweenka Soomaaliyeed, ka hor inta aanu horgaynin Golaha Wasiirada; si waafaqsan Qod.3^{aad} (5) iyo Qod.51^{aad} (5)(a) ee Dastuurka KMG ah.)
2. Waxaa lagu kordhiyay **Faqardda 1^{aad} bis** oo u qoran sidan: (Xubnaha Guddigu waa in ay yihiin dad lagu yaqaanno hufnaan iyo aqoon maamul.)

QOD 9^{AAD}
Wax-Ka-Beddelka Qod.55^{aad}

1. Qod.55^{aad} Faqradda 1^{aad} Faqrad hoosaadka III ee ku saabsan Xilalka Sarkaalka Idman waxaa loo qoray sidan: (Abaalguddida iyo wargelinta go'aanka abaalmarinta qandaraaska kaddib ansixinta talo bixinta cidda qandaraaska ku guleysatay ee uu soo jeediyo Hay'adda leh ogolaanshaha waa inay waafajisaa qodobka 30^{aad} farqadiisa 1^{aad} ee xeerkan.)

QOD 10^{AAD}
Wax-Ka-Beddelka Qod.57^{aad}

1. Qodobka 57^{aad} Faqradda (b) oo cinwaankiisa oo beddelay Shaacinta Hay'ad Iibin waxaa loo qoray sidan:
 - (b) Ma jireyso hay'ad iib Qandaraas oo qaban karta wax hawlo iib ah ilaa uu caddeyo Maamulku in:
 - (i) Guddiga iibka, iyo Unuga iibka oo la soo dhishay/ la sameeyay;
 - (ii) Waxaana si rasmi ah loo magacaabay sarkaal idman; iyo,
 - (iii) Maamulku wuxuu qiimeeyay Waaxda iibka inay leedahay awooddii ay ku qaban lahayd hawlaha iibka ayadoo u hoggaansamaysa Xeerkan
 - (c) Maamulka ayaa go'aan ka gaaraya haddii la arko khaladaad soo noq noqday oo ay samaynayso Waaxda iibka si ay u qabato shaqooyinkeeda si waafaqsan Xeerkan,
 - (i) Maamulka wuxuu joojinayaa Waaxdaasi haddii aysan laheyn awooddii loo baahnaa inay shaqada iibka ku qabato sida Xeerku qabo.
 - (ii) Waaxda Iibku marka laga joojiyo shaqada iibka, waxa ay arrimaheeda iibka u wakiilan kartaa wakiil iib ama hay'ad kale oo iib, si waafaqsan Qodobka 64^{aad} Faqradda 2^{aad}.

QOD 11^{AAD}
Wax-Ka-Beddelka Qod.59^{aad}

1. Qod.59^{aad} Faqradda 4^{aad} oo ku saabsan Hawlaha Guddiga Qandaraaska Iibka waxaa loo qoray sidan: (Dib u eegista dalabka iyo qiimeynta warbixinnada soo jeedinta iyo abaalmarinta heshiis la soo jeediyay oo siinaya ansixin ama haddii kale ay awood u siyaan Waaxda Qandaraaska Iibka iney sii waddo hannaanka Qandaraaska Iibka, halka ansixinta caynkaasi ah ay tahay masuuliyadda Guddiga iibka sida ku xusan Qodobka 30^{aad} farqadiisa 1^{aad}).

QOD 12^{AAD}
Wax-Ka-Beddelka Qod.68^{aad}

1. Qod.68^{aad} oo ku saabsan Waqtiga Qandaraaska La Galayo waxaa loo qoray sidan: (Marka laga reebo xaaladaha deg dega ah ama go'aan oggolaansho hore

oo ay gaareen Guddiga Qandaraasyada Iibka Hay'adda, Hay'adaha Iibinta ma geli karaan qandaraas iib ilaa ay ka soo wareegto afar iyo toban (14) maalmood maaltintii la shaaciyey ciddii ku guuleysatey qandaraaska lagu tartamayey sida ku cad Qodobka 83aad farqadiisa 4^{aad}.)

QOD 13^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.83^{aad}

1. Qod.83^{aad} (Faq 3^{aad} & Faq 4^{aad}) oo ku saabsan Abaalmarinta Qandaraaska waxaa loo qoray sida:

(3. Isla mar ahaantaa uu qiimaha qandaraaska ka bato heerarka ku qeexan Xeer Nidaamyaha, waa in la ogeysiyaa tartamayaasha kale iyo Maamulka, iyadoo la tilmaamayo magaca iyo cinwaanka guuleystaha la soo jeediyey iyo qiimaha qandaraaska.

4. Qandaraaska waa inaan la saxiixin ilaa ugu yaraan ay ka soo wareegtay 14 cisho gudahood, kaddib siinta ogeysiiskaas loogu oggolanaayo tartame walba oo caraysan inuu ku soo gudbiyo cabasho ama racfaan. Inta lagu jiro 14-ka maalmood eela sugayo natijada qandaraaska la shaaciyay qiimihiisana la jaangooyay ee ku xusan Qodobka 74aad ee Xeerkani, Maamulku wuxuu samayn kara arimahan:

- a) Dib u eegista dhammaan habraaca loo maray qandaraaska lagu guulaystay;
- b) Iclaamin kusaabsan in la kordhiyo waqtigii sugitaanka oo ahaa 14-ka maalmood, si ay waqti ugu helaan dib u eegista, haddii loo baahdo; iyo
- c) Iclaamin ku saabsan in la hakiyay ku- dhawaaqidda natijada qandaraska haddii Maamulku u arko in Qodob ku xusan Xeerka la jebiyay.)

QOD 14^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.84^{aad}

1. Qod.84^{aad} Farqadda 2^{aad} & 3^{aad} oo ku saabsan Aqbalaada Qandaraaska Dhaqangalka iyo Saxiixa Qandaraaska waxaa loo qoray sidan:

2) Marka loo baahan yahay qandaraaska iibka in la saxiixo:

(a) Qandaraaska iibka waa in ay bilaabaan Waaxda iibka iyo qandaraaslaha loona gudbiyaa Hanti- dhowraha guud si loo diiwaan galiyo.

(b) Diiwaangalinta Hantidhowraha guud waxay ka dhigan tahay:

(i) Xaqiijinta in qandaraaskii uu helay Hanti-dhowraha guud si loo diiwaan galiyo;

(ii) Hanti-dhowraha guud wuxuu xaqiijinayaa in qiimaha ku yaalla qandaraaska uu la jaan qaadayo ama uusan khilaafsanayn miisaaniyadda loo qoondeeyay Waaxda iibka; iyo,

(iii) In saxiixa lagu saxiixay magaca waaxda iibka uu yahay mid munaasab ah.

(c) Hanti-dhowraha guud awood uma leh inuu dib u eegis ku sameeyo ama uu ansixiyo dhinacyada kale ee qandaraaska, ama dhinacyada la xiriira tallaabooyinka iyo hababka uu soo maro iibku.

(d) Hantidhawrka Guud waxaa u bannaan inuu meesha ka saaro shuruudaha diiwaangelinta kuna bixiyo qoraal ahaan, isagoo eegayo Wax ku oolnimada, qandaraasyada ka hooseeya xaddiga qiimaha la jaangooyey. Marka sharcigan ama dukumintiga lagu dalbanayo (solicitation document) in lasoo gudbiyo codsiyada ay qeexaan in qandaraaska ay tahay in uu ogolaado maamul kale, oo ay ku jiraan ogolaanshihi lagu xusay Qodobka 30aad, qandaraaska iibka ma noqon doono mid dhaqangala haddii aan la ogolaan.

3) Qandaraasyada iibka waxay si rasmi ah u dhaqan galayaan oo kaliya ka dib marka:

(a) Bixintiisu waafaqsan tahay qodobada sharcigan;

(b) Uu Diiwaan galiyo Hanti-dhowraha guud, hadii aan shuruudaha laga cafin sida ku xusan Qodobka 84aad faqradiisa 2aad. Faqradiisa d. iyo,

(c) Qandaraaska ay saxiixaan dhincyada ay khuseyso

QOD 15^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.86^{aad}

2. Qod.86^{aad} Faqradda 1^{aad} oo ku saabsan Tartan Ka Qaybgal Dalab Xaddidan ama Kooban waxaa loo qoray sidan:

1) Hay'adda Iibinta waxay sameyn kartaa tartan ka soo qaybgal qandaraas dalab xadidan ama kooban halkii ay ka qaban lahayd tartan ka soo qaybgal qandaraas dalab furan oo la shaaciyay waxayse ku xiran tahay ogolaanshaha Guddiga Qandaraaska iibka Hay'adda marka qiimaha ku xusan qandaraaska la filayo inuu dhaafo qaddarkii lacageed ee la jaangooyay ee lagu xusay xeer nidaamiyaha, iyo in ay Guddiga iibku ogoladaan dhammaan xaaladaha kale:

(a) Badeecadaha, hawlaha ama adeegyada laga heli karo oo keliya tiro xaddidan ee tartamayaal qandaraas ah oo la yaqaano; ama.

(b) Hay'adda Iibinta ay waajib ku tahay bixinta iney xaq u leedahay si ay uga jawaabto jiritaanka baahi iib oo deg deg ah.

QOD 16^{AAD}

Wax-Ka-Beddelka Qod.89^{aad}

1. Qod.89^{aad} Faqradda 1^{aad} oo ku saabsan Qandaraas Bixinta Tooska ah waxaa loo qoray sidan:

2) Marka oggolaansho (prior approval) hore laga haysto guddiga iibka, marka qiimaha ku xusan qandaraaska la filayo inuu dhaafo qaddarkii lacageed ee la jaangooyay ee lagu xusay xeer nidaamiyaha, iyo in ay Guddiga iibku oggoladaan dhammaan xaaladaha kale, Hay'adda Iibinta waxay u hawlgelin kartaa si toos ah ama habraaca bixin qandaraas hal il kaliya marka ay jiraan xalaadaha soo socda:

QOD 17^{AAD}
Wax-Ka-Beddelka Qod.94^{aad}

1. Qod.94^{aad} Faqradda 3^{aad} oo ku saabsan Xulashada Ku Salaysan Tayada iyo Qiimaha waxaa loo qoray sidan:
 - 3) Hay'adda Iibinta waxay adeegsanaysaa "Codsiga Loogu Talagalay Soo Jeedimaha" caadiga ah oo ay ku jiraan warqadda ka qaybgalka dalabka, wargelinta talo bixiyeyaasha, shuruudaha tixraaca iyo heshiiska la soo jeediyay.
 - (i) Haddii qiimaha ku xusan qandaraaska iibka uu ka sara maro heerkii lacageed ee la jaangooyay ee lagu caddeeyay xeer nidaamiyaha, shuruudaha lagu muujiyay qodobka 72^{aad} ee tartammada furan waxa uu khusaynayaa hab-raac ku salaysan xulasho ku dhisan tayo iyo qiimo.

QOD 18^{AAD}
Wax-Ka-Beddelka Qod.176^{aad}

1. Qod.176^{aad} Faqradda 2^{aad} oo cinwaankiisu yahay Qoddobo Ku Meel Gaar ah waxaa loo qoray sidan:
 - 2) Sida lagu xusay qodobka 125^{aad} (1) halka aragtida Maamulka ee sii wadidda wax heshiis sharcigan ah ama wax kasta oo la qabtay ama uu qof sharcigan ku xadgudbay, markaa Maamulka wuxuu qaadi karaa talaabooyinka ku habboon ee lagu saxayo meelaha isdhaafku ka jiro ilaa laga gaarayo in la is waafajiyo si waafaqsan sharcigan.
 - (a) Inta laga magacaabay Guddiga Iibka ee Qaranka iyo Agaasimaha, muddo ku siman 120 maalmood gudahood laga billaabo maalinta Madaxweynuhu saxiixo wax-ka-beddelka sharcigaan laguna soo saaro faafinta rasmiga ah, Wasaaradda ayaa sii qabanaysa awoodihii uu lahaa Guddigaas sida xeerkan ku xusan.
 - (b) Wasaaradda ayaa go'aan ka gaaraysa qorshaha horrumarinta ee ku habboon ee dhinaca shaqaalaysiinta xoghaynta Guddiga Qandaraaska iibka. Qorshahaasi shaqaalaysiinta waxaa ku jiri Kara, isticmaalidda shaqaalaha sii joogay ee Wasaaradda Maaliyadda si ay u buuxiyaan doorarka xoghaynta, illamaa waqtiga si madax bannaan ay Guddiga Qandaraaska ee Iibka uga shaqaalaysiinayaan shaqaale leh tayaddii looga baahnaa.
 - (c) Ayadoo aan la baalmarayn Qodobka 176^{aad} Faqradiisa 5^{aad}, Wasaaradda waxaa lagula xisaabtamayaa, hubinta in imkaaniyaatkii (resources) loo baahnaa ay diyaar u yihiin Maamulka iyo Guddiga Dib u eegista si ay waajibaadkooda u gutaan sida ku cad sharcigan.
2. Qod.176^{aad} waxaa lagu kordhiyay faqrad cusub oo u qoran sidan: (Sharciga Iibka ee Qaranka wuxuu qabanayaa howlaha iibka iyo qandaraasyada heer federaal, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka waxay leeyihiin shuruuc iib oo heerkooda ah.)